

# Shuruudaha Tallaallada Iskuulka:

## Fasalka 12<sup>aad</sup>

(School Requirements for Immunization: 12<sup>th</sup> grade)

Tallaallo ayaa laga rabaa ardeyda Wisconsin.\* Iskuulka ayaa laga heli karaa koobbiga foomka Student Immunization Record (Diiwaanka Tallaalka Ardeyga) ama kala soo dego: <https://www.dhs.wisconsin.gov/library/F-04020L.htm>.

Marka la bilaabayo sannad-dugsiyeedka cusub, iskuulka u gee foomka Student Immunization Record (Diiwaanka Tallaalka Ardeyga).

\*Shuruudaha busbuska ayaa la isaga dhaafi karaa sababo la xiriira caafimaadka, diin ama sababo shakhsiyadeed.



## Sidee baan u soo buuxinayaa Student Immunization Record (Diwaanka Tallaalka Ardayga)?



La xidhiidh dhakhtarkaaga ama waaxda caafimaadka ee deegaanka oo ka qabso **ballanta tallaalka** sida ugu dhaqso badan.



Dhakhtarka u sheeg in **laguu buuxiyo** Student Immunization Record (Diiwaanka Tallaalka Ardeyga) (F-04020L) ka dibna adigu **saxiix** foomka.



**Sii** foomka Student Immunization Record (Diiwaanka Tallaalka Ardeyga) iskuulka marka la bilaabayo sannad-dugsiyeedka cusub.



**La xidhiidh** dhakhtarka ama waaxda caafimaadka ee deegaanka haddii aad **u baahan tahay caawimaad** ama macluumaad dheeraad ah.



Waxaad caddeynta tallaalka ardeyga kala socon kartaa oo aad ka daabacan kartaa barta internetka ee Wisconsin Immunization Registry (Diiwaanka Tallaalka Wisconsin): <https://www.dhs.wisconsin.gov/immunization/wir.htm>.

## Tallaalladee iyo qiyaas intee leeg ayaa laga rabaa ardayga markuu joogo dugsiaga?

► Waxa laga yaabaa in dhakhtarku ku taliyo tallaallo dheeraad ah si loo ilaaliyo caafimaadka ardayga.

4

Dabeysaha

4

DTaP/DTP/DT/TD

2

Jadeecada, Qanjo xanuunka, Jadeeco-beenaad

3

Cagaarshowga B

2

Tallaalka Xuubmaskaxeedka oo ay ku jirto ACWY<sup>#</sup>

1

Tdap

2

Habloobaa

\*\*Tallaalka busbuska lagama rabo ardeyda uu busbusku mar hore ku soo dhacay marka uu dhakhtar soo caddeeyo daawaqore (MD, DO, NP ama PA). Haddii ay waalid sheegaan oo laga qoro in ilma busbus ku soo dhacay, waa la aqbalayaa. Ardeyda cusub waa in ay caddeyn ka keenaan goob caafimaad oo dhab ah oo shaqeysa.

<sup>#</sup>Tallaal labaad lagama rabo ardeyda soo qaadatay tallaalka koowaad ee MenACWY marka ay da'doodu gaarto 16 jir ama ka weyn.

